



**Maku nooshahay
isbitaal, rug lagu
xannaaneeyo dadka
waaweyn ama
xarunta baxnaaninta
degaanka oo ma
dooneysaa in lagaa
caawiyo in aad
bulshada dib
ugu noqoto?**

Xiiseyntaada barnaamijka Waddooyinka Nolosha Bulshada (Roads to Community Living) ayaa muhiim noo ah.

Haddii aad rabto macluumaad dheeraad
ah oo arrintan ku saabsan iyo barnaamijyada
kale ee kala-guurka, booqo




Si aad u hesho macluumaad ku saabsan barnaamijka
Waddooyinka Nolosha Bulshada ee Maamulka
Taageerada Muddada-dheer iyo Waayeelka, booqo:
www.dshs.wa.gov/altsa/rcl



Si aad u hesho macluumaad ku saabsan
barnaamijka Waddooyinka Nolosha Bulshada
ee Maamulka Naafonimada Koritaanka, booqo:
www.dshs.wa.gov/dda/rcl



DSHS 22-1297X SM (Rev. 2/25) Somali



Waddooyinka Nolosha Bulshada

**Ka Caawinta Dadka
Dib Ugu Noqoshada
Bulshooyinkooda
iyo Kobocooda**



Dib-ugu-noqoshada Bulshadaada

Waa maxay Waddooyinka Nolosha Bulshada?

Waddooyinka Nolosha Bulshada waa qayb ka mid ah barnaamij qaran oo loo yaqaanno *Lacagtu Qofka Ayay Raacdaa (Money Follows the Person)*.

Iyadoo loo marayo barnaamijkan, ayaa gobolka Washington wuxuu sahaminayaa adeegyada iyo taageerada dadka ka caawiya baahiyada daryeelka muddada-dheer, adag ee sida guusha leh loogaga baxayo xarumaha sida isbitaallada iyo rugaha lagu xannaaneeyo dadka waaweyn ka-dibna dib loogu noqonayo bulshada. Kuwani waxaa ay noqon karaan kharashaad halmar oo kaliya ah ama adeegyada loo baahan yahay inta lagu guda jiro dib ugu noqoshadaada bulshada.

Haddii aad xaq u leedahay ama aad dooneyso in aad barnaamijka ka-qaybgasho, waxaad:

- Heli kartaa caawimaad hal-hal ah oo gaar ah si loola diyaariyo qorshe kala-guur adeegyada iyo taageerada aad u baahan taahy si aad ugu noqoo bulshada.
- Heli kartaa adeegyo dheeraad ah iyo taageero aan hadda laga heli karin barnaamijyada jira.



Kumaa Ka-qaybgali Kara Barnaamijka?

Waddooyinka Nolosha Bulshada (Roads to Community Living) waxaa loogu talagalay qof walba:

- Ku nool isbitaal, rug lagu xannaaneeyo dadka waaweyn ama xarumaha baxnaaninta degaanka ah muddo laba bilood ah ama ka badan.
- Qaadanaya Medicaid si uu u bixiyo kharashka daryeelka.



"Waxaa ay nagu qaadatey lix bilood iyo dadaal badan. Aniga oo taageero ka helaya kooxda Roads to Community Living, waxaan dib ugu noqday guriga!"

Adeegyada iyo Taageerada La Heli Karo?

- Maamulaha kiiska iyo qorsheynta kala-guurka.
- Waxaa lagaa caawin karaa in aad hesho guryeyn la awoodi karo.
- Waxaa lagaa caawin karaa dharka aasaasiga ah iyo agabka reerka si aad u hagaajiso gurigaaga.
- Tababarka xirfadaha nololeed ama adeegyo la talin oo kaa caawinaya u diyaar-garowga in aad mar kale bulshada ku dhex noolaato.
- Tababbarka xirfadaha taageerada hab-dhaqanka iyo dhibaato xallinta.
- Aaladaha gacansiinta iyo adeegyada taageerada ee adeegsiga agabkan.
- Nidaamyada Wax-ka-qabashada Xaaladaha Degdegga ah ee Shakhsiyeed.
- Tababbarka, waxbarashada, ama taageerada qoyska iyo daryelayaasha kale.
- Wax-ka-beddelka guriga ama dayactirada yaryar si lagaaga taageero in aad si ammaan ah ugu noolaato gurigaaga. Tusaalooyinka waxaa ka mid ahaa kaabayaal iyo gacan-cuskad.
- Xaalad waafajinta gaadiidka sida wiishashka kursiga curyaanka ama kantaroolada gacanta.
- Gaadiidka aan caafimaadka ahayn.

